## Xafiiska Qarammada Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya (UNPOS)

**WAR-SAXAAFADEED 001/2010**

# Ergeyga Gaarka ee Xoghaga Guud ee Soomaaliya (SRSG) oo booqday magaalada Muqdisho isagoo uu weheliyo U Qaybsanaha Midowga Afrika ee Arrimaha Nabadda iyo Amaanka

Neyroobi, 25 Janaayo 2010 **–** Ergeyga Gaarka ee Xoghaga Guud ee Soomaaliya (SRSG), Ahmedou Ould-Abdallah, ayaa maanta booqasho ku tagay magaalada Muqdisho isagoo ay weheliyaan U Qaybsanaha Midowga Afrika ee Arrimaha Nabadda iyo Amaanka, Md. Ramtane Lamamra, iyo Md. Boubacar Diara, oo dhowaan loo magacaabay inuu noqdo Ergeyga Gaarka ah ee Guddoomiyaha Guddiga Midowga Afrika (SRCC) si ay wadahadallo ku saabsan arrimo kala duwan ula yeeshaan qaar ka mid ah madaxda sare ee Dowladda Soomaaliya oo uu ka mid yahay Madaxweyne Sheekh Sharif.

Kulanka intuu socday, labada dhinac waxay ka wadahadleen arrimaha taagan ee mudnaanta gaarka ah leh iyo hawlaha hadda ka socda goobaha kaabayaasha dhaqaalaha. Isagoo ku hadlaya magaca Dowladda iyo kan Ummadda Soomaaliyeedba, Madaxweynuhu wuxuu Qaramada Midoobay, Midowga Afrika iyo guud ahaanba Bulshada Caalamka uga mahad celiyay taageerada iyo kaalmada joogtada ah ee ay la garab taagan yihiin umadda Soomaaliyeed. Madaxweynaha, Guddoomiyaha Barlamaanka, iyo Ra'iisaaraha waxay tacsi u direen qoysaska dadkii ku waxyeelloobay dhulgariirkii dhowaan ka dhacay waddanka Haiti. Waxay ka naxeen khasaarihii weynaa ee Qaramada Midoobay ka soo gaaray masiibadaas.

Wafdigu wuxuu kaloo booqday xarunta Ciidanka Nabadilaalinta Midowga Afrika ee Soomaaliya (AMISOM) halkaas oo lagu siiyay warbixin kooban oo ku saabsan hawlaha ay ciidanka AMISOM halkaa ka wadaan. Sidaas baa wafdigu u garowsaday hawsha ay hayaan ciidanka nabadilaalinta Midowga Afrika.

---

Wixii war dheeraad ah fadlan kala xiriir: Susannah Price ama Donna Cusumano, saraakiisha qaabilsan isgaarsiintab guud, Xafiiska Qaramad Midoobay u Qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya, Nairobi

Tel. +254 20 762 7132/7133 ama +254 733902020 ama 737400133
Fadlan eeg rugta Internet-ka (website):
**www.unpos.unmission.org**